GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND
SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES









# Warbixinta Shir-gudoonka ee Wax-qabadka Kal-fadhigii 11aad ee Golaha (07 April-03 June 2025)

Afnaan Awad Ali

# ARRAAR

## Mudanayaal.

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 12aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhiyadii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore aynaan dhamaystirin.

Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena iyo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadka Kal-fadhigii 11aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhiyadaas.

## TUSMADA WARBIXINTA

**HORDHAC** ........ 3
**WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 11AAD** ........ 4
**Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii** ........ 4
**Xeerarka Goluhu Ansixiyay** ........ 4
**Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay** ........ 4
**Mooshinadii Golaha la horkeenay** ........ 5
**Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Golaha horyaala** ........ 6
**GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY** ........ 6
**WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII** ........ 7
Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ........ 7
Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta ........ 9
Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka ........ 9
Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ........ 9
Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ........ 10
Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska. ........ 10
Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada ........ 10
Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca ........ 11
Gudidda Arrimaha Bulshada ........ 12
**KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH** ........ 17
**SAFARADII DIBADA LOO BAXAY** ........ 21

# HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation).

Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 11aad mudaddii u dhexaysay **24 Nov 2024 illaa 03 June 2025** oo fasax laba bilood ahi u dhexeeyay. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhigii 11aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

# WAX-QABADKA KAL-FADHIGII 11^AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 11^aad ee Golaha Wakiillada***

1. Fadhiyadii Golaweynaha ee *Kal-fadhigii 11^aad* — 13 Kulan
2. Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn — 22 Kulan
3. *Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada* — *35 Fadhi/kulan*

## Warbixinadii Golewaynaha laga hor Jeediyay Sannadkii 2024kii

Waxa Kal-fadhi 11^aad Golaha laga horjeediyay 4 Warbixinood oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Miisaaniyado, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| 12 April 2025 | Warbixinta Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada ee Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xeebaha | Gudoomiyaha Gudidda Md. Aadam Cismaan Xarbi |
| 13 April 2025 | Warbixinta Guddida Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Xeerka Rahanka Hantida Ma-guurtada ah | Gudoomiyaha Gudidda Md. Xuseen Ismaaciil Jaamac |
| 15 April 2025 | Warbixinta Xukuumada ee Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Xukuumada | Md. Khadar Xuseen Aadam Wasiirka W. Madaxtooyada iyo Garyaqaanka Guud Md C/samad Maal. |
| 28 May 2025 | Warbixinta Guddida Garsoorka, Cadaaladda, Shuruucda iyo Xuquuqal Aadamaha ee Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda. | Gudoomiyaha Gudidda Md. Jamaal Cali Aadan (Jaah) |

## Xeerarka Goluhu Ansixiyay

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | U gudbay | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xuduuddaha | G. Guurtida | 10/05/2025 |

## Masuuliyiintii Qaran ee Xilalkooda Goluhu Ansixiyay

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. C/naasir Axmad Xirsi | Gudoomiyaha Bangiga Dhexe | 11/05/2025 |
| 2. | Md. C/casiis Xirsi Warsame | Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 |
| 3. | Md. Xamse C/raxman Khayre | Gud. Ku-xigeenka Bangiga Dhexe | 11/05/2025 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 4. | Md. Xasan Xuseen Cabdi | Gud. Ku-xigeenka H.  Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 |
| 5. | Md. Sakariye C/raxman Ismaciil | Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 |
| 6. | Md. Jabarti Axmad Xasan | Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 |
| 7. | Md. Mustafe Maxamed Cawil | Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 |

## Mooshinadii Golaha la horkeenay

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Ansixintii |
|---|---|---|---|
| 10 May 2025 | Soo jeedinta Mooshin ku saabsan qayb-galka shirarka iyo wada-hadalada la xidhiidha Arrimaha Somaliliya. | Md. Cali Jaamac Caraale | Sharci ahaan wuu buray |
| 10 May 2025 | Soo jeedinta Mooshin ku saabsan wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Jinsiyada Xeer Lr 22/2002. | Md. Maxamed Xasan Siciid | Sharci ahaan wuu ansaxay |
| 26 April 2025 | Soo jeedinta Mooshin ku saabsan in Wax-ka-beddelkq iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Ciidanka Booliska Xeer Lr. 63/2013. | Md. Max'uud J. Koodbuur | Sharci ahaan wuu ansaxay |
| 26 April 2025 | Soo jeedinta Mooshin ku saabsan in Goluhu ka soo saaro Go'aan Gole oo jidaynaya in dib-haybayn iyo Qiimayn lagu sameeyo Goobaha Codbixinta Doorashooyinka Dalka Jsl. | Md. Jamaal Cali Adan (Jaah) | Sharci ahaan wuu ansaxay |

## Mashaariicda Sharci (Xeerar) ee Golaha horyaala

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Cidda gacanta ku haysa |
|---|---|---|
| 1. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Wakaalada Madbacada Qaranka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 2. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Duulista Hawada | Gudidda Hawlaha Guud |
| 4. | Mashruuc Sharciga Aasaaska Kaydka Haamaha Shidaalka | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 5. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 6. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 7. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka |
| 8. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Wax ka badelka Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 10. | Wax ka badelka Xeerka Ciqaabta Guud | Gud. Garsoorka, Cadaalada & X. Insaanka |
| 11. | Wax ka badelka Xeerka Jinsiyada | Gudidda Arr. Gudaha & Nabadgalyada |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |
| 2. | Xeerka Rahnka Hantida Ma guurtada ah | Golewaynaha |
| 3. | Xeerka Sharciga Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |

### J. XeerarkaGuurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalada Xeebaha | Golaha Guurtida |

### X. Xeerarka Madaxweynuhu soo celiyay

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Dakhliga iyo Cashuuraha Guud | Madaxwaynuhu soo celiyay |

## GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY

Intii lagu jiray kal-fadhigii 11[aad] Goluhu wuxuu sameeyay go'aano ansixineed oo gacan taag **12 jeer**, go'aanadaas oo uu ku ansixiyay Xeerar, masuuliyiin qaran, Mooshino, qaraaro iyo ajanadayaal. **12** kaas go'aana waxay kala ahaayeen: -

| 1. | Nooca Go'aanka | Tariikhda | U gudbay |
|---|---|---|---|
| 2. | Go'aankii Ansixinta Ajandaha Kal-fadhiga 11aad | 07/04/2025 | Shir-gudoonka |
| 3. | Go'aanka Ansixinta Mooshinka wax ka badelka Xeerka Booliiska Somaliland | 26/04/2025 | Golewaynaha |
| 4. | Go'aanki Anxinta Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo I. Xeebaha | 10/05/2025 | G. Guurtida |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 5. | Go'aanka Ansixinta Mooshinka wax ka badelka Xeerka Jinsiyada | 10/05/2025 | Golewaynaha |
| 6. | Go'aanki Anxinta Md. C/naasir Axmad Xirsi Gudoomiyaha Bangiga Dhexe | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 7. | Md. C/casiis Xirsi Warsame Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 8. | Go'aanki Anxinta Md. Xamse C/raxman Khayre Gud. Ku-xigeenka Bangiga Dhexe | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 9. | Go'aanki Anxinta Md. Xasan Xuseen Cabdi Gud. Ku-xigeenka H. Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 10. | Go'aanki Anxinta Md. Sakariye C/raxman Ismaciil Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 11. | Go'aanki Anxinta Md. Jabarti Axmad Xasan Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 | Madaxweynaha |
| 12. | Go'aanki Anxinta Md. Mustafe Maxamed Cawil Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 11/05/2025 | Madaxweynaha |

## WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi oo kala ah.

1. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
2. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
3. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
4. Gudidda Arrimaha Bulshada
5. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
6. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
7. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
8. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
9. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
10. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban.

### Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 54aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, Waxa ay Guddidu kal-fadhigii 11aad ay qabatay shaqooyin badan waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:-

## Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta  Qaran

- **02 March 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.**

## Kormeeridii & Safaradii ay Gudiddu samaysay

- **17-20 July 2025** Waxay Gudiddu kormeer shaqo la qaadatay ku tagtay Gobolada Galbeedka dalka ee Awdal iyo Salal ujeeddada kormeerka iyo booqashada Gudiddu waxay ahayd inay ku kuurgasho Xaalada Abaareed ee ka jirta, waxaynu Gudiddu Golewaynaha la wadaagi doonta Warbixin ay ka diyaariysay kormeerkaas.

## Kulamo Gudiddu la yeelatay Maamulka (Qaybta Xoghaynta) Golaha

Muddadii u dhaxaysay **01-15 July 2025,** waxa ay kulammo rasmi ah la yeelatay Xoghayaha Guud iyo Agaasimayaasha Waaxyaha kala duwan ee Maamulka Golaha Wakiillada. Kulamadan oo isugu jiray kuwo gaar-gaar ah iyo kuwo wadareed, ayaa ujeeddadoodu ahayd in lagu qiimeeyo habsami-u-socodka shaqada Golaha, caqabadaha jira, hufnaanta maamulka iyo xaaladda shaqaalaha.

Guddidu waxay warbixintan ku soo gudbinaysaa natiijada kulamadaasi, waxaana ka soo baxay qodobo muhiim ah oo muujinaya baahida loo qabo dib-u-habayn maamul, dejinta Xeer lagu maamulo nidaamka shaqada iyo shaqaalaha, iyo dardar-gelinta hufnaanta maamulka iyo xisaab-xidhka. Warbixinta waxaa sidoo kale ku jira talooyin muhiim ah oo Guddidu u aragto in lagama maarmaan ay tahay in la tixgeliyo.

**Ujeeddooyinka Kulamada:-** Kulamadan waxa ay Guddidu u abaabushay, iyada oo ka duuleysa ujeeddooyinka hoos ku xusan:

- In la helo warbixin rasmi ah oo dhammaystiran oo ku saabsan xaaladda maamulka Xoghaynta Golaha.
- In Guddidu si toos ah su'aalo ula yeelato Xoghayaha Guud iyo Agaasimayaasha Waaxyaha, si waafaqsan Xeer-hoosaadka.
- In la qiimeeyo heerka uu gaadhsiisan yahay nidaamka maamulka shaqaalaha iyo isla-xisaabtanku.
- In Guddidu hesho xog dhab ah oo ku saabsan mushaharka, tirada iyo tayada shaqaalaha Golaha.

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 58aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii 11aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **15 May 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Hay'adda Afooyinka iyo ka hortaga Masiibooyinka ee NADFOR.
- **14 May 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta
- **29 May 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Kalluumaysiga iyo Hormarinta Bada **Cali Jaamac Faarax (Buureed**)
- **27 May 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta

## Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Goluhu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 60aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii 11aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **02 July 2025** Waxay Guddidu kulan la yeelatay Xubin ka mida Golaha Deeganka Caasimada Hargaysa Md. Siciid Cabdisamad Cudhay isaga oo Guddida la wadaagay Xogo muhiim ah oo la xidhiidha musuq uu sheegay in u ka dhacay dhismaha Suuqa Waheen.

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 59aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii 11aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **23 July 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Cadaalada **Mudane Yoonis Axmad Yoonis**

## Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadu iyo Ganacsiga iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 61aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii 11aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka 2025

- **08 May 2025** Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga waxay Kulan Xog-warran ah la yeelatay Masuuliyiinta Cusub ee Baanka Dhexe **Md. Cabdinaasir Axmed Xirsi, Guddoomiyaha Baanka Dhexe, iyo Md. Xamse Cabdiraxmaan Khayre, Guddoomiye Ku-xigeenka Baanka Dhexe,**

### Xeerarka iyo Miisaaniyada ay Golewaynaha u soo gudbisay

- **05 May 2025** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay Mashruuca Xeerka Rahanka Hantida Ma guurtada ah.

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 63aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii labada kala-fadhi waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **17 June 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta Md.  Md. C/laahi Daahir Jaamac

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 62aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **09 April 2025** waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaaradda Duulista iyo Horumarinta Madaarada **Mudane Fu'aad Axamd Nuux**

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **10- July- 2025,** Guddidu waxay kulan ugu Yeedhay Wasaaradda Arimaha Bulshada, Qoyska iyo Shaqada, Kulanka oo lagu falan-qeeyay Qaabka iyo Qorshaha lagu gali karo shaqada Wax-kabadalka Xeerka Jinsiyadda JSL, waxaana kasoo qaybgalay Kulankan Wasiir kuxigeenka Wasaaradda, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, Agaasimaha Waaxda Gender-ka iyo Lataliyaha Sharci ee Wasaaradda.
- **08- July- 2025,** Guddidu waxay kulan ugu yeedhay Ururka Haweenka ee NAGAAD NETWORK, kulanka oo lagaga tashanayay qorshaha lagu bilaabi karo Latashiyada Dadwayne ee Wax-kabadalka Xeerka Jinsiyada JSL oo ay Guddidu gacanta ku hayso.
- **27- May- 2025,** waxa Xafiiska Guddida ka qabsoomay kulan lagaga tashanay Mooshinka wax-badalka Xeerka Ciidanka Booliska JSL, kulanka oo ay kasoo qaybgaleen Taliyaha Ciidanka Booliska, Hogaanka Hawgalinta Ciidanka Booliska iyo Taliyaha Qaybta Baadhista Dambiyada ee CID.
- **27- April- 2025,** Guddidu waxay kulan xog-waraysi shaqo ugu yeedhay Taliyaha Ciidanka Booliska JSL **Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Xasan "Cabdi Dheere",** oo Guddida uga warbixiyay xaaladda amni ee dalka iyo Diyaargarawga Munaasibadda Qaran Ee 18 May.
- **23- April- 2025,** Guddidu waxay Xafiiskeeda ku Qaabishay Hay'adda ICRC, oo guddida uga warbixisay shaqooyinka ay Hay'addu qabato oo kamid ah is-waydaarsiga maxaabista dagaalada, kulankaas oo lagu lafo-guray marxaladdaha maxaabiis is-waydaarsiga iyo dhexdhexaadinta oo inta badan ay ka shaqayso hay'addani
- **17- April- 2025,** Guddidu waxay kulan xog-waraysi shaqo ah ugu yeedhay Agaasiamaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka JSL, kulankaas oo uu agaasimuhu warbixin ka siiyay xaaladda amni ee dalka, sidoo kalena la wadaagay qorshaha dib u habaynta iyo casriyaynta ee Hay'adda Sirdoonka Qaranka.
- **12- April- 2025,** Gudiddu waxay kulan xog-waraysi ah ugu yeedhay Gudoomiyaha Gobolka Maroodi-jeex **Mudane Axmed Maxamed Diiriye "Cadaad",** Gudoomiyaha Gobolka oo Guddida war-bixin waafi ah ka siiyay xaaladda iyo caqabadaha Amni ee Gobolka Maroodi-jeex.
- **09- April- 2025,** Guddidu waxay kormeer shaqo ku tagtay Xarunta dhexe ee Ciidanka Socdaalka iyo Ilaaladda Xuduudaha JSL, Kormeerkan oo ujeedadiisu ahaa in Guddidu u kuurgasho Xaalada shaqo Ee Ciidanka Socdaalka, Madaama ay guddidu gacanta ku haysay Qabyo-qoraalka Xeerka Ciidanka Socdaalka.

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **02 June 2025** waxay Gudidda Arrimaha Gudaha waxay kulan dadwayne iyo wada-tashi markii labaad u qabtay Wax ka badelka Xeerka Booliiska oo Gudiddu gacanta ku hayso.

### Xeerarka ay Golewaynaha u soo gudbisay

- **12 April 2025** Guddidu waxay Golewaynaha u gudbisay Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Ciidan Socdaalka iyo Ilaalada Xeebaha.

## Gudidda Arrimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshada iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 64^aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeeda kal-fadhigii 11^aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **17 July 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Hay'adda save the chidren**
- **14 July 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Xafiiska Ingiriiska (British Office**
- **24 June 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **koox dhakhaatiir ah oo ku takhasustay Samaynta Afka iyo Ilkaha, kuwaas oo ka tirsan ururrada caafimaadka ee dalka.**
- **18 June 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Komishanka Tacliinta Sare**
- **08 May 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay **Guddida Cusub ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda**

### Kormeeradii Gudiddu samaysay

- **13 June 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada oo kormeer shaqo ku jooga Gobolka Gabilay ayaa waxay kormeer shaqo ku tageen **Dhakhtarka weyn ee Magaalada Gabilay**
- **13 June 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada oo kormeer shaqo ku jooga Gobolka Awdal ayaa waxay kormeer shaqo ku tageen **Adal Teaching Hosbital iyo Dakhtarka Dhimirka ee Magaalada Boorama.**

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **01 July 2025** waxay Gudidda Arrimaha Bulshada ayaa kulan dadwayne ugu qabtay Xarunta Golaha Wakiillada Wax ka badelka Xeerka Warbaahinta oo Gudiddu gacanta ku hayso.

### Masuuliyiintii ee ay Golewaynaha uga soo tala-bixisay Ansixintooda.

- **12 May 2024** Gudiddu waxay Golewaynaha u soo gudbisay ugana soo warbixisay **Md. C/laahi Axmad Faarax Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada** si xilkaas Goluhu ugu ansixiyo.

## Xaalada Abaareed ee Gobolada Galbeedka iyo Waftigii G. ku-xigeenka 2aad

Waxaa Xaalad abaareed oo aad u adag ka dhacday Gobolada Galbeedka Somaliland ee Awdal iyo Sallel, abaartaas oo guud ahaan saamaysay deegaanada ee ku teedsan xeebbaha Gobollada Awdal iyo Sallel oo xoolo-dhaqato ah, iyada oo qiyaastii 78% dadweynuhu ay ku tiirsan yihiin xoolaha oo ah isha koowaad ee noloshooda, sidaa darteed, abaartu waxay si ba'an u saamaysay Dad iyo Xooloba deegaanada ay ka jirto.

**14 July 2025** Waxa Magaalada Hargaysa ee Caasimada ka ambabaxay wafti balaadhan oo uu hogaaminayo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Md. Cali Xaamud Jibriil, waxaana waftigan ka mid ahaa:-



1) **Md. Ahmedyaasiin Mohamed Faarah** W. Wasaarada Dhalinyada iyo Cayaaraha

2) **Md. Eng Ahmed Jaamac** W. Wasaarada Macdanta iyo Tamarta

3) **Md. C/rahmaan Shide Bile,** Wasiir ku xigeenka W. Dib U-deinta.

4) **Hay'addaha Caalamiga ee kala ah:-**

- Save the children
- UNICEF
- World concern
- Islamic Relief
- Wf Germany

Waftigan oo Ujeedada safarkoodu ahaa si ay ugu kuur galaan ama ay usoo qiimeeyaan xaaladda abaareed ee ku habsatay Gobolada Awdal iyo Sallel, muddadii ay safarka ku jireen waxay soo mareen deegaanada kala ah:-

1. **Degmada Lughaya**
   a) Geerisa ee Degmadda Lughaya
   b) Deegaanka Karuure ee Degmada Lughaya
   c) Gargaara Bari ee Degmada Lughaya
   d) Deegaanka Sheegdheer ee Degmada Lughaya
   e) Deegaanka Gab ee Degmada Lughaya
2. **Degmada Saylac**
   a) Deegaanda Ceelgaal iyo Caasho-caddo ee Degmada Saylac
3. **Degmada Baki**
   a) Caroweyne ee Degmada Baki

b) Xooray ee Degmada Baki
c) Xamarta ee Degmada Baki




Saddexdii sano ee la soo dhaafay waxa deegaannadan ka jirey roob la'aan iyada oo xaaladu ka sii daraysay marba marka ka danbaysa. Dhul daaqsimeedkii dabiiciga ahaa gabi ahaanba wuu baaba'ay, isaga oo aanay ku hadhin wax daaq ah oo xooluhu ku noolaadaan. Waxa xaaladda uga sii daray juqraafi ahaan cimilada kulul ee deegaannadan oo inta badan gaadha ilaa 45°C, taas oo abuurtay xaaladdo nololeed oo adag. Xaaladdan waxa ka dhashay xaaluf ba'an, taas oo waxyeelo weyn gaadhsiisey caafimaadka iyo wax-soosaarka xoolaha. Xaaladdan waxaa sii xumeeyay cudurro ku dhacay xoolihii oo dhamaantood ka dhigay wax dhintay iyo wax liito.




Hadaba, Waftiga Gudoomiye ku-xigeenku hogaaminayay waxay safarkan deegaanadaas abaaruhu saameeyeen iyo xaalada ay ku soo arkeen ka diyaariyeen **Warbixin uu Gudoomiyuhu la wadaagi doono hay'addaha ay khusayso iyo Golahaba.**

## Maalinta la-kulanka Dadwaynaha ee Golaha Wakiillada

**14 May 2025** Waxa xarunta Golaha Wakiillada lagu qabtay kulan aqoon-korodhsi ah oo si gaar ah loogu talagalay arday ka socotay Dugsiga Sare ee Al-Daarayn, waxaana kulankan oo ardayda Dugsigaasi Golaha soo booqdeen lagu siiyay aqoonkorodhsi ku saabsan shaqada iyo hab-maamulka Golaha Wakiillad iyo guud ahaan Baarlamaanka Jamhuuriyadda Somaliland.

Kulankan oo qayb ka ah maalinta loo asteeyey "Maalinta albaabada Goluhu u furan yahay Bulshada" ayaa ujeeddadiisu ahayd in ardayda Dugsiyada Sare iyo Jaamacadaha dalka lagu fahansiiyo nidaamka shaqo ee labada Gole Baarlamaan (Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida), qaab-dhismeedkooda, waajibaadkooda iyo sida ay u fuliyaan xilalka Dastuuriga ah ee loo igmaday.




Munaasabadda aqoon-korodhsiga ah waxaa si rasmi ah u daah-furay **Md. Xasan Axmed Cilmi (Xasan-Kayse)** oo ka tirsan Xubnaha Golaha, wuxuuna si diirran ugu soo dhoweeyey xarunta Golaha Wakiillada, isagoo tilmaamay muhiimadda ay leedahay in jiilka cusub la baro hannaanka dimuqraadiyadeed ee dalka iyo kaalinta muhiimka ah ee Baarlamaanku kaga jiro hoggaaminta Qaranka.

Sidoo kale, waxaa ardayda hadallo dhiirrigelin iyo xog-warran ah siiyey Xildhibaanada dhawr ah oo ka tirsan Golaha Wakiillada Somaliland, Xildhibaanadu waxay si qoto dheer uga hadleen muhiimadda ay leeyihiin kulamada noocan ahi, iyagoo carabka ku adkeeyey in ay lagama maarmaan tahay in la joogteeyo si dhalinyaradu u helaan fahan dhab ah oo ku saabsan shaqada Baarlamaanka, gaar ahaan dhinacyada Xeer-dejinta, kormeerka hay'adaha fulinta, iyo matalaadda shacabka. Dhammaan mudaneyaashaasi waxay ballanqaadeen in Golaha Wakiilladu uu sii wadi doono qabashada iyo ballaadhinta kulamada noocan ah ee lagu wacyigelinayo bulshada. Dhanka kale, Agaasimaha Waaxda Warbaahinta, Xidhiidhka Dadweynaha iyo Tignoolajiyada ee Golaha Wakiillada, Mr. Cabdilaahi Cabdi Aadan, ayaa ardayda siiyey sharaxaad dhammaystiran oo la xidhiidha:

- Qaab-dhismeedka Golaha.
- Shaqada iyo waajibaadka Golaha
- Habraacyada maamulka Golaha

Ugu dambayn, ardayda Dugsiga Sare ee Al-Daarayn ayaa la siiyey fursad ay su'aalo toos ah ku weydiiyaan Xildhibaanada, kuwaas oo si hufan, furan, kuna salaysan xog rasmi ah uga jawaabay dhammaan su'aalihii la weydiiyey. Mudaneyaasha ayaa caddeeyey in Golaha Wakiilladu mar walba diyaar u yahay in uu bulshada siiyo xogta ay u baahan yihiin.

## KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH

- **Kulan & Qad-sharaf Gud. ku-xigeebka 1aad ku maamuusay Sentor Keysa Jama**

**19 July 2025** Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ahna Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, **Md. Siciid Mire Faarax (Giire**) wuxuu qado-sharaf ku maamuusay **Senator Kayse Jama** oo ah Hoggaamiyaha Aqlabiyadda Aqalka Sare ee Gobolka Oregon ee dalka Maraykanka, iyo Cabdirisaaq Maxamed Jaamac, Guddoomiyaha Ururka Somaliland Strategic Advisory Group (SL-SAG) ee dalka Maraykanka.

Munaasibadda oo ka dhacday Hargeysa ayaa ahayd mid si diiran loo soo agaasimay, iyadoo lagu muujiyay qadarin iyo martigelin lagu maamuusay doorka muhiimka ah ee ay labadan masuul ka ciyaaraan xoojinta xidhiidhka Somaliland iyo Dalweynaha Maraykanka.



Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Wakiillada, Md. Siciid Mire Faarax ayaa intii ay socotay munaasibaddu hadal kooban oo soo dhawayn ah ka jeediyay, isagoo uga mahadceliyay Senator Keyse Jama iyo Guddoomiye Cabdirisaaq Maxamed Jaamac booqashadooda Somaliland, iyo dadaalkooda gaar ahaan dadyowa klaga tirada badan yahay ee dalkaasi oo ay dheer tahay in Senator'ka iyo Ururka SAG ee cabdiueisaaq madaxda ka yahay isku taxallujiyaan sidii dalka iyo dadweynaha Maraykanku ahmiyad gaar ah u siin lahaayeen mandaqaddan Somaliland ka midka tahay. Wuxuu sidoo kale xusay in la xoojin doono

wada-shaqaynta iyo is-dhexgalka dhexmara Baarlamaanka Somaliland iyo siyaasiyiinta Maraykanka.

Munaasibadda waxaa kale oo ka qaybgalay xildhibaano ka tirsan Golaha Wakiillada, gaar ahaan Guddiyada kala duwan ee ay ka kooban yihiin guddiyada Golaha Wakiilladu, iyo lataliyaha Shirgudoonka Golaha Wakiillada.

- **Kulankii Madaxda Hay'adda Max Planck Foundation**

**12-07-2025** Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland, **Mudane Yaasiin Xaaji Maxamuud Xiir (Faratoon)** ayaa maanta xafiiskiisa ku qaabilay madaxda sare ee **Hay'adda Max Planck Foundation.**



*Gudoomiyaha iyo Madaxda Sare ee Golaha oo kulan la yeeshay Madaxda Hay'adda Max planck Foundation*

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray wada-shaqaynta u dhexaysa Hay'adda Max Planck Foundation iyo Golaha Wakiillada, gaar ahaan mashruuca taageerada Xeer-dejinta iyo horumarinta nidaamka Baarlamaanka, kaas oo hadda maraya marxaladdihii u danbeeyay. Madaxda hay'addu waxay si guud u warbixiyeen waxqabadkii la qabtay, halka shirguddoonka Golahu uu ku bogaadiyay kaalinta iyo doorkii ay hayaddu ku lahayd xoojinta iyo tayaynuta Golaha Wakiillada.

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa xusay in mashruucani uu door weyn ka qaatay tayeynta hawlaha Xeer-dejinta, kor u qaadista xirfadaha xubnaha Golaha, iyo habaynta nidaamyada shaqo. Waxa uu sidoo kale iftiimiyay sidii iskaashigaashigani uu u noqon lahaa mid sii socda.

- **Kulan Gudoomiyuhu la yeeshay Senator Keyse Jama oo Maraykan ah.**

**12 July 2025** Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Md. Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon) ayaa Xafiiskiisa ku qaabilay **Senator Keyse Jama** oo ah hoggaamiyaha Aqlabiyadda Aqalka Sare ee Gobolka **Oregon ee Maraykanka.** Waxa labada dhinac isweydaarsan warbixino kooban oo ku salaysan xoojinta xidhiidhada sokeeye iyo iskaashi ee labada dhinac,

Gudoomiyuhu wuxuu sentor-ka ku bogaadiyay u heelanaanta iyo adeegida bulshda iyo sida uu gu dooddo dadka soo galootiga iyo bulshooyinka aan si wayn loo matelin ee gudaha Maraykanka, sidoo kale wuxuu Gudoomiyuhu u xaqiijiyay sentorka sida Golaha Wakiillada Somaliland diyaar ugu yihiin xoojinta xidhiidhka laba dhinac oo siyaasad kaliya ku koobnayn ee mid dhaqaale ioy mid bulsho ku ka mid yihiin.



Guddoomiyaha waxa ku wehelinayey kulanka Guddoomiye-ku-xigeenka 1aad Mudane Siciid Mire Faarax iyo xubno ka tirsan Guddiga Arrimaha Dibedda ee Golaha iyo Xafiiska Shirguddoonka. Dhinaca kale waxa Senator'ka weheliyey Guddoomiyaha SL-SAG ee Maraykanka cabdirisaaq Maxamed Jaamac.

- **Wafti Xildhibaano ka socday Baarlamaanka Dalka Kenya.**

**18-05-2025** waxa dalka lagu soo dhoweeyay wafdi xildhibaanno ah oo ka socday Baarlamaanka dalka Kenya, Wafdigan ayaa socdaal ku yimid caasimadda Hargeisa si ay uga qaybgalaan xuska munaasibadda 18-ka May. Shirguddoonka Golaha Wakiillada Somaliland oo ay weheliyaan Xildhibaanno ka tirsan labada Gole ee Baarlamaanka Somaliland (Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida) ayaa habeenimadii 18 May casho sharaf gaar ah u sameeyey.

Kulanka munaasibaddan casho-sharafta ah ayaa ahayd fursad lagu adkeeyay xidhiidhka iskaashi iyo saaxiibtinimo ee u dhexeeya Baarlamaanka Somaliland iyo dhiggooda Kenya. Sidoo kale, waxaa lagu lafaguray arrimo la xidhiidha horumarinta xidhiidhka labada dhinac iyo iskaashiga mustaqbalka ee dhinacyada sharciga, dimuqraadiyadda iyo horumarka.

- **Wafti Xafiiska Dawlada Ingiriiska ee Somaliland**

**27-04-2025** Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Jamhuuriyada Somaliland Md. Yaasiin Xaaji Maxamuud Xiir (Faratoon) ayaa Xafiiskiisa ku qaabilay Madaxa Xafiiska Dawladda Ingiriiska ee Somaliland (Head of British Office in Somaliland) Louise Hancock oo dhawaan loo soo magacaabay Xafiiskan.

Kulankan oo ay Gudoomiyaha ku wehelinayeen, Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Md. Siciid Mire Faarax (Giire) iyo Guddoomiyaha Guddida Arrimaha Dibada Md. Maxamed Xassan Siciid, Lataliyaha Shirgudoonka Golaha Wakiillada Mr Xassan Maxamed Jaamac (Xassan xiis).



Gudoomiye Faratoon waxa uu uga mahadnaqay Madaxa Xafiiska Dawladda Ingiriiska ee Somaliland iyo guud ahaan Dawladda Ingiriiska doorkeeda wada shaqayneed iyo xidhiidhka qotada dheer ee ka dhaxeeya Somaliland iyo Dawladda Ingiriiska, dhinaca kale, Guddoomiyuhu waxa uu xaqiijyey ka Gole ahaan, in ay diyaar u yihiin in ay la shaqeeyaan Madaxa Xafiiska sidii ay ula shaqeeyaan Madaxdii iyada

Dhanka kale Maxadaxa Xafiika Uk Mss Louise Hancock, ayaa sheegtay in ay diyaar u tahay in xidhiidhkii wanaagsanaa ee ka dhexeeyey Xafiiska iyo Somaliland ay halkii ka sii amba qaadi doonto sidoo kalana si dhaw ula shaqayn doonto Golaha Wakiilada iyo Dawladda Somaliland.

## SAFARADII DIBADA LOO BAXAY

- **Wafti Xildhibaano Golayaasha Baarlamaanka Somaliland oo Baarlamaanka UK tagay.**

**26 June 2025**, Wefti Golayaasha Baarlamaanka Somaliland ka socda oo Xarunta Baarlamaanka ee Dal weynaha Ingiriiska lagu Qaabilay. Xildhibaano Golayaasha Wakiiladda iyo Guurtidda ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Somaliland ka tirsan oo Safar shaqo dalka Ingiriiska ku jooga ayaa Xarunta Baarlamaanka ee Dawladda Boqortooyadda Ingiriiska lagu qaabilay. Xildhibaanadda Golayaasha Wakiiladda iyo Guurtidda Somaliland ka tirsan ee Ingigiriiska ku sugan oo kala ah

1. Md. Mohamed Jaamac Koodbuur
2. Md. Jaamac Abokor Maxamed Dube
3. Md. Saleebaan Maxamed Diiriye iy0
4. Xildhibaad Caydiid oo ka tirsan Golaha Guurtida

Sidoo kale waxa Xildhibaanada ku weheliyay **Amb. Cabdi C/laahi iyo Cawaale Ibraahim Shirwac** oo Jaaliyada Somaliland ee Dalka Ingiriiska ka tirsan, waxaana kulan hormood ka ahaa oo booqashada Xarunta Baarlmaanka Boqortooyada Ingiriiska u fududeeyay waftiga laba Xildhibaan oo ka tisan Baarlamaanka Ingiriiska oo ka mida Saaxibadda Qaddiyadda Somaliland u olileeya oo kala ah' **Hon. Caving Williams** iyo **Hon. Kim Johnson.**





Wafftigan Xildhibaanadu waxay kulan gaara xarunta Baarlamaanka kula qaateen xubno ka mida Baarlamaanka Ingiriiska iyada oo ay u sharaxeen Qaddiyadda Somaliland iyo inay buuxisay dhamaan shuruudihii ay dalka Ingiriiska iyo dawladaha kale ee Caalamku ku aqoonsan lahaayeen.

### ➢ Safar Xildhibaano Dalka Ingiriiska ah

**27 June 2025** Dalka Ingriiska swaxa afar shaqo ku tagay Xildhibaano ka tirsan Golaha Wakiillada Somaliland oo martiqaad ka helay dalkaas, kuwaas oo kala ahadaa:-

Md. C/qani Maxamed Aadam (Qaniyo)
Md. Axmad Muuse Jaamac
Md. Axmad Cabdi Ibraahim (Timo-jilic)



Xildhibaanada ayaa intii ay ku sugnaayeen dalka Ingriiska waxay kulamo kala duwan la yeesheen Madaxda Dalkaas sida Xisbiyada, Baarlamaanka iyo kooxaha u ololeeya qadiyada Somaliland, sidoo kale waxay kulamo soo dhawayn ah ku qaablay Jaaliyada reer Somaliland ee Gobolada kala duwan ee dalkaas ku dhaqan.

Kulanka ugu horeeyay waxay la yeesheen XIldhibaanada Baarlaamka Ingriiska ee Cardiff iyo Penarth oo ka mid yahay **Kerry McCarthy**, kaas oo uu xubin ka ahaa koox ka tirsan labada Baarlamaan ee Ingiriiska iyo Somaliland **(All-Party Group for Somaliland)** oo la sameeyay 20 sanno ka hor, taas oo dib loo soo noolaynayo dhowaana la samaynayo kulan lagu daah furayo kaas oo hormood ka yihiin Madaxda Xisbiga Labour Party ee dalkaasi, iyadoo loogu magac daray **LABOUR FRIENDS OF** SOMALILAND ujeedada loo aasaasayna tahay xoojinta xidhiidhka Bulshada Somaliland iyo Xisbiga Labour party ee dalkaasi.

Waxa kale oo Xildhibaanadu kulan muhiim la qaateen Jaaliyada **Cardiff ee Wales** oo ka tirsan Boqortooyada Ingiriiska, iyadoo Jaaliyadu si diiran Xildhibaanada u soo dhoweeyeen, waxayna Xildhibaanadu warbixin ka siiyeen jaaliyada xaalada guud ee dalka.

Waftigani inta ay ku sugan yihiin Boqortooyada Ingiriiska waxa u qorshaysan inay kulamo kala duwan la yeeshaan madaxda dalkaas si ay u gaadhsiiyaan qadiyada Somaliland.

- **Safarkii Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee North America.**

**21 May 2025** ·Guddoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiillada Jamhuuriydda Somaliland **Md. Cali Xaamud Jibriil** oo booqasho ku joogay Wadanka Maraykanka ayaa booqasho sharafeed ku tegay Aqalka Wakiillada ee **Gobolka Minnesota**, iyada oo ay ku soo dhaweeyeen Aqalka labada Xildhibaan ee kala ahaa **Jay Xiong iyo Rich Hansen.**



Booqashadan oo ah mid kor loogu qaadayo xidhiidhka Somaliland iyo Maraykanka iyo sidii la isku Dhaafsan lahaa xogaha muhiimka ah, iyo muujinta qaddarinta taageerada joogtada ah ee Jamhuuriyadda SOMALILAND ee ka socota USA.

Kulamada noocan oo ah kuwo shaki la'aan horumarinaysa qadiyadda Somaliland, isla markaana gacan ka geysan doonta dedaallada socda ee dhinaca Aqoonsiga Caalamiya oo Dawlada Somaliland ka hesho Aduunka iyo Gaar ahaan USA.

- **Safarkii Xildhibaan Jaamac Abokor Dubbe**

**June 2025** Xildhibaan **Jaamac Abokor Dubbe** oo ka mid ah Mudaneyaasha Golaha Wakiilada oo safar ku jooga Dalka Maraykanka ayaa Kulamo kala duwan la qaatay Madaxd kala duwan oo Dalkaas ah, wuxuuna Xiildhibaanku **06 June 2025** kulan la qaatay madaxda ugu sarraysa Golaha sharci dejinta ee Gobolka Minneapolis isaga kulan gaar ah la qaatay Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha ee Baarlaamanka Gobolka Minneapolis **Mr Jay Xiong.**




Xildhibaan Jaamac Dubbe oo xaruunta Baarlaamanka lagu casuumay ayaa xildhibaannada Minnesota u soo jeediyey in ay booqasho ku yimaaddaan Somaliland si ay dhaayahooda ugu soo arkaan horumarka ay Jamhuuriyaddu ku tallaabsatay iyo qaabka ay u hawl galaan Goleyaasha Somaliland.

Xildhibaanku waxuu isu xilqaamay oo waddamo badan oo caalamka ah umarayaa sidii uu qadiyadda Madax bannaanidda Jamhuuriyadda Somaliland uga dhaadhicin lahaa Aduunka, wuxuuna safaro kala duwan ku soo maray Dalaka **Maraykanka, Canada iyo UK.**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**